Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku socota Soomaalida Qurbaha ku nool (No. 10)**

Jabuuti, 28 January 2009

Asaalamo Caleykum

Saaxibayaal,

Mar-labaad ayaan warqadaan idin soo dirayaa si aan idinkaga waramo arrimmaha sida deg-degta leh uga socda dalkiina gudahiisa iyo dibadadiisaba. Sida aad ugsoon tihiin, waxaan aamin sanahay in ay aad muhiim u tahay in aan idinla wadaago dhammaantiin wixii war ah ee jira.

Sida aad dhammaantiin ka warqabtaan, sanooyin dagaalo farabadan ay dhaceen ka dib, wey adag tahay helitaanka xasiloonida. Laakiin hadda waxaa jira rajo dhab ah oo aan saas u fogeyn. Waxaad guul weyn ka gaarteen sideedii bilood ee la soo dhaafay.Maanta, halkaan Jabuuti, waxaa ka jira dhaarinta inta badan ee labddii boqol (200) ee xubnihii baarlamaanka aha oo ay soo xushay Isbaheysiga Dib-Uxureynta Somalia, laguna soo xulay habka awood qeybsiga ah ee 4.5. Qof-ahaan, waxaa aad ii dhiiri geliyey in aan arko xubnihii TFG-da iyo ARS-ta ahaa oo si wadjir u ah hal baarlaamaan ku wada jira, waxaana rajeynaya in uu ka dhex jira doono iskaashi ama wada shaqeeyn miro dhal ah.

Doorashada Madaxweynaha, ee la filaayo in ay dhacdo maalinta Jimcaha ah, ayaa si weyn loo sugayaa. Sida aad ogsoon tihiin waxaa jira dhowr musharixiin ah. Hogaanka Soomaaliyeed iyo Bulshada caalamkuba si wadjir ah ayey u shaqeynayaan si loo xaqiijiyo in habka doorashado ahaato mid hufan (transparent) cadaaladna ku dhisan, kuna wejahan helitaanka nabadda.

Madaxweynaha cusub ee Soomaaliyeed, waxaa la dhaarin-doona sabtiga, kadibna wuxuu u safri doona Addis Ababa si uu uga qeybgalo shirka madaxeedka Ururka Midowga Afrika oo dhici doonta (1-2 Feberuary) taas oo ah inta aan la xulin Raisul-Wasaarah iyo Golahiisa Wasiirada. Dhammaan xubnaha baarlaamaanka iyo golaha wasiiradoba waa in ay ku noqdaan asbuuca soo socda Muqdishu.

Dhammaan saaxibadiina waxay jeclaan la haayeen in ay arkaan balaarinta baarlamaanka iyo doorashada madaxweynaha oo ka dhacaaya gudaha Somalia. Hase ahaatee talaabadaan muhiimka ah kuna wejahan dib usoo celinta nabadgelya waa in

ay xaqiijida in dhammaan wixii geedi-socod siyaasadeed ah lagu qabto meesha ay ku haboon yihiin ee dalkiina gudahiisa ah.

In kasta oo ay jirto rajo xoog leh, hadana waxaan dhammaan ka warqabnaa in aysan dhaqso ku dhamaaneynin dhibaatidii ka dhalatay sanooyinkii badnaa ee dagaalada iyo dega-naasho la'aanta aheyd, iyo ku xadgudubka xuquuqul insaanka iyo falalka musuq-maasuqa ku dhisan aysan hal habeen ku baaba-eynin. Fidna-wadayaasha iyo taageera-yaashooduba waxay wadi doonan in ay iska dhega-tiraan ama carqaladeyaan si dadaalada socda aysan ugu dhaqaa-qin dhinaca nabadda, xasiloonida iyo cadaalada bacdamaa ay filanayaan in jalayaashooda iyo bulshada caalamkuba ay dul-qaadanayaan dhaqankooda.

Waxaa run ah in ururo badan iyo shakhsiyaad daneeya arrimmaha Somalia ay diida-yaan in ay ka hadlaan arrinta ku saabsan 'impunity'- dhaqanka ah denbi-gal ee iska soco adiga oo wax ku-qabanaya aysan jirin. Dad badan ayaga oo arimaha Somalia meel fog ka eegaya, ayeye Soomailiya u noqotay meel si joogta aha tusaale xumaaneyd ee xaga diinta, qabiilka iyo siyaasada oo aan xitaa xabaarsaneyn in wax yar oo xal ah lagu gaari karo. Hase ahaatee, waxaan hada huba in waqtigii impunitiga (waa dhaqan ku fadhiya inta dambi la galo oo hadana qofkii galay iska soconaayo asaga oo xur ah) uu hada gabaabsi-yahay.

Waxaan rabaa in aan mar labaad carabka ku adkeeyo in aan wax cudur daar ah loo heleynin in Somalí ay Somali disho. Is miidaamintii dhawaan ka dhacday Muqdisho waxey aheyd fal wax burburin ah oo macno la,aan ah waxaana arinita fuliyey kuwo aan xurmo u heynin nafta dadka rayid ah. Waxaana dhiirigilinaya in aan ogaanay in si-isa soo tareysa ay daku iskaga fogeynayaan kuwa fidna wadayaasha ah ama af duubka dadka u qabsada. Hadaba, arrintu waxay ku xirantahay sida ay wax uga qabtaan aabayaasha, hooyooyinka, iyo walaalaha caruutooda la is-ticmaalayo si ay isu taagto rabshada ay sameynayaan ubadka walaalihiina ah. Labaatankii sano ee tagtay, kooxna kuma gaarin in ay guul waarta ku gaaraan qas-kaan. Kuwa waxbaan idin sameynaynaa mustaqbalka yiraada ma fulin karaan balan qadkooda hadayna nabadi jirin.

Maanta, wadankiinu waxu u baahanyahay isu dul qaadasho iyo is kaashi ka dhex dhaca dadkiina. Waxa aad ka cabataan in dad badan oo Somalí aheyn ay idinka quraan artikalo iyo rebooro sheegaya in aydan waligiin nabad gelyo heleynin. Hadaba maadaama aad heysantaan geedi socodkaan Jabuuti, idinka ayey idinku xirantahay in aad beeni-saan warka kuwa reboorada aan soo sheegay idinka qoraya.

Ugu dambeyntii waxaan ku farax sanahay in aan idin sheego in Tun Dr Mahatir Mohamed, oo ahaa ra,isulwarihii hore ee Malasia uu ogo-laaday in uu la hadlo baarlamaankiina cusub berito oo Khamiis ah. Waxaa lagu yaqaanaa in wadankiisa ka hergiliyey dib u heshiisiin. Waxa kale ee uu ku guuleystay in wadan kiisa u kaga saaray faqriga hal fac ama jiil gudihiisa.

Walaakiin,

Ahmedou Ould-Abdallah.